

A.F.I. S.

XEER 3 agoosto 1957 - L. 9 rep.

Dugsiga sare ee cilmiga.

Xoghayaha Guud

Marki uu arkay Wareegtada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Talyaaniga, 9 disembar 1952, n. 2357;

Marki uu arkay wareegtada Maareeyaha ee 29 luuliyo 1953, no. 118, ee lagu xaddiday muddada dowrooyinka dugsiga sare ee cilmiga ee magaalada Muqdisho muddo shan sano ah isla markaana dejiyey barnaamijyada iyo qaababka ay u shaqeeynayaan Dugsiyada waaweyn ee magaalooyinka waaweyn;

Marki uu Garaaqsaday fursadda lagu yareynayo muddooyinka dowrooyinka lagu soo xushay dugsiga sare ee cilmiga ilaa afar sano, sida ku xusan qawaaniinta loo dejiyey dugsiyada sare ee cilmiga ee dibedda, sidaas awgeed qaadashada dib u hagaajin barnaamijyada waxbarasho;

Marki uu arkay xeerka 12 abriil 1950, n. 5, iyada oo loo adeegsanayo nidaamkii Dugsiga gumeysiga lagu ansaxiyay sharciga wareegtada boqortooyada 24 luuliyo 1936, n. 1737;

Marki uu Dhagestay Guddiga Maamulka;

WUXUU XEEREYAY:

Qod. 1

Laga bilaabo sanad dugsiyeedka 1957-58, muddada waxbarashada ee Dugsiga Sare ee Cilmiga ee Muqdisho waxaa laga yareeyay min shan illaa afar sano.

Si la mid ah saameyntii aan kor ku soo sheegnay ee dugsiga sare ee Cilmiga, barnaamijyada iyo qaababka ay u shaqeeyaan Dugsiyada u dhigma Dugsiyada Talyaaniga ee dibedda ah ayaa loo howlgeliyey, iyo sidoo kale shuruucda ku-meel-gaarnimada ee ku xusan qodobka soo socda ee fulinta ugu horreysa ee qodobkan.

Qod. 2

Dowrooyinka afarta sano ah waxa ay ka bilaabmayaan sanad dugsiyeedka 1957-58 ardayda dhigata shahaadooyin caadi ah, sanad dugsiyeedka la soo sheegay, fasalka koowaad iyo kan labaad. Ardayda loo ogolaado fasalada seddexaad, afaraad iyo shanaad isla sannad dugsiyeedka dowladooda ayaa weli ahaan shan sano iyo gurid, sidoo kale ardayda ay tahay inay ku soo celiyaan fasalka sanadka uu hirgalo nidaamka afarta sano ah asgaas (shan sano) ayey raacayaan.

Muqdisho, 3 agoosto 1957.

P. Franca

Arkay Diiwaangelinta – Buug n. 23.- warqad n. 99.

Muqdisho, 30 agoosto 1957.

Garsooraha xisaabaadka: **Spadaro**